

Tilmaan Degdeg ah oo ku aadan Diiwaanka loogu talagalay Macmiilka-Cida loo shaqeeyo

Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon: <https://or-hcc.org/>

SI AAD ISKU DIIWAANGELISO

- 1 Riix barnaamijka ku siiya adeegyada:
 - Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Waaweyn ee qaba Naafanimada Dhanka Jirka
 - Dadka qaba Naafanimada Korriinka ama dadka Maskax ahaan Naafada ka ah
 - Ku Xirnaanta Mukhaadaraadka iyo Caafimaadka Dhimirka
- 2 Dooro “Cida loo shaqeeyo ee Cusub?” iyo Riix si aad isku diiwaangeliso “Click to Register.”
- 3 Samee koontadaada Diiwaanka
 - Magaca lagu gelayo waa in uu ugu yaraan ka koobnaadaa afar calaamood — xaraf, lambar ama (haddii ay suurtagalka tahay) isku-dhafka xarfo iyo lambaro.
 - Ha isticmaalin magacaaga dambe ama lambarka (Muhiimka ah) ee Medicaid ama wixii macluumaad shakhsi ee kale ee rabin in uu qof kale ogaado.
 - Gali ama dib u gali lambarka/xarafka sirta ah ‘password’.
 - Lambarka/xarafka sirta ah ‘password’ waa in uu ugu yaraan ka koobnaadaa lix xaraf/lambar/calaamadood.
- 4 Riix halka ay ku qoran tahay Isdiiwaangeli “Register.”



The screenshot shows a registration interface. At the top, there is a button labeled "New Employer?" with a "Click to Register" link next to it. Below this, a section titled "Please provide the following information to create your Registry account" contains three input fields: "Username", "Password", and "Confirm Password". A "Register" button is located at the bottom right of this section. Arrows from the numbered steps point to these elements: Step 1 points to the "New Employer?" button; Step 2 points to the "Click to Register" link; Step 3 points to the "Username", "Password", and "Confirm Password" fields; and Step 4 points to the "Register" button.

Talo: Marka la sameysanayo Magaca lagu gelayo, waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad isku daydo wax badan hal mar si aad u abuurto mid aan hore loo isticmaalin.

Xusuuso in aad qorto Magaca lagu gelayo ‘User name’ iyo Lambarka/xarafka sirta ah ‘Password’ waxaanad dhigtaa meel ammaan ah. Haddii aad u baahan tahay in aad lambarka/xarafka sirta ah ‘password’ dib u soo bilowdo ama caawimaad u baahan tahay, email u dir Registry.OHCC@State.OR.US, ama wac 877-867-0077 inta lagu jira saacadaha shaqada ee caadiga ah.

DHAMMEYSTIR QAYBAHA KALE

Qaybta 1 — Macluumaadka shakhsi iyo waxyaabaha la doorbidayo

Adiga ayaa dhammeystiraya macluumaadka ku saabsan baahiyahaaga si Diiwaanku ula wadaagi karo shaqaalaha suurtagalka ah.

Buuxi ama hubi macluumaadkaaga ee mid kasta ee meelaha wax laga sii geliyo ‘tabs’ ee soo socda:




Talo: Riix halka ay ku qoran tahay inta badan cusbooneysii si aad u keydiso macluumaadkaaga isla markaana u xaqiijiso in website-ku aanu iska joogsan.


Qaybta 2 — Hubi waxyaabaha la doorbidayo isla markaana raadso shaqaale

Qaybtan waa adeegyada isbarbardhiga Diiwaanka. Wuxuu isticmaalaa macluumaadka laga helo qaybtan 1 si loo abuurto liiska shaqaalaha suurtagalka ah ee sida fiican ugu habboon waxa aad sheegtay in aad u baahan tahay.

Meesha wax laga sii geliyo ee Macluumaadka kooban ‘Summary tab’: Meeshan wax laga sii gelayo ‘tab’ waxay soo koobtaa dhammaan macluumaadka la geliyay shanta meelood ee laga sii gelayo ‘tabs’ waxayna muujisaa qaabka uu leeyahay. Dib u eeg dhammaan macluumaadka halkan ka hor inta aadan isticmaalin meeshan la sii gelayo Tixraacyada ‘Referrals tab’ si aad u hesho shaqaale.



Meesha la sii gelayo Tixraacyada ‘Referrals tab’: Ka dib marka la dhammeystiro macluumaadka ku jira shanta meelood ee laga sii gelayo ‘tabs’, ee kor ku qoran, Diiwaanku wuxuu si toos ah u abuurto doonaa liiska shaqaalaha suurtagalka ah. Liiska shaqaalaha ayaa la go’aamiyaa iyada oo la isticmaalayo kala xulashada laga soo doortay meelaha wax laga sii geliyo ‘tabs’ ee kor ku qoran.



Badhanka sii Kordhi ‘Expand button’: Shaqaale kasta oo ku jira liisku wuxuu yeelan doonaa sanduuqa kordhi “expand” oo ku xiga magacooda. Riix sanduuqan iyada oo macluumaadka kooban ee shaqaaluhu uu soo muuqan doono. Liisku waa mid habeysan si shaqaalaha sida aadka ugu dhigma waxyaabaha aad doorbidayso uu ugu jiri karo halka sare ee liiska.

Lambarka daryeel bixiyaha: Shaqaale kasta waxaa loo qoondeeyaa Lambarka daryeel bixinta Medicaid. Haddii aad go’aansato in aad shaqaaleysiiso shaqaale isla markaana aad hesho adeegyada Medicaid, magaca shaqaalaha iyo lambarka daryeel bixiyaha u soo sheeg maamulahaaga kiiska, wakiilkaaga shakhsi ama iskuduwahaaga adeegyada si qofka loogu oggolaan karo in uu kuu shaqeeyo. Haddii kale, waxaa laga yaabaa in aan shaqaalahaaga lacag la siinin.

Cusbooneysiinta macluumaadka: Xaqiiji in aad cusbooneysii sharaxaadaada marka isbeddelku dhaco.

Qaybta 3 — Soo gelinta xayaysiiska ah caawimaad baa loo baahan yahay ‘help wanted’ (waajib maaha)

Qaybtani waxay ku tusaysaa sida loo soo geliyo xayaysiis ay shaqaalaha daryeelka guriga ama taageerada shakhsiyeed arki karaan.

Ma jeclaan lahayd in shaqaalaha mustaqbalka la filayo ay si toos ah kuula soo xiriiraan? Macmiilka-cida loo shaqeeyo waxay soo gelin karaan xayaysiis si ay u soo jiitaan shaqaalaha la heli karo. Shaqaalaha ka soo jawaaba xayaysiiskani waxay raadinayaan shaqo waxaana dhici karta in aanay ku jirin liiska tixraaca.

Soo gelinta xayaysiis, waxaad ogoshahay in macluumaadkaaga la siiyo daryeel bixiyayaasha raadinaya shaqo. Macluumaadkan si toos ah ayuu wakhtigiisu u dhici doonaa marka muddada aad doorato wakhtigeedu dhaco, ama waad geli kartaa waxaanad xayaysiiskaaga joojin kartaa waqti kasta (hoosta fiiri).

- Dooro Muddada Xayaysiiska “Ad Duration” adiga oo isticmaalaya badhanka meesha la sii geliyo ‘dropdown menu’.
 - Xayaysiisku wuxuu socon doonaa 7, 14 ama 30 maalmood midkood, iyada oo ku saleysan xulashadaada.
 - Taariikhda xayaysiisku ku eg tahay ka fiiri dhinaca sare ee bogga.
- Geli macluumaadka la iskala soo xiriirayo ee aad jeclaan lahayd in shaqaaluhu isticmaalo marka uu ka soo jawaabay xayaysiiska.
- Waxaa lagugu dhiirigelinayaa in aad geliso qoraalka shakhsi ahaaneed si loola wadaago shaqaalaha mustaqbalka la filayo.
- Xaqiiji in **aadan** magacaaga oo buuxa ama cinwaankaaga aadan raacin xayaysiiska,
- Waxaa laga yaabaa in aad rabto in aad samayso cinwaanka email-ka oo gooni ah oo loogu talagalay ujeedadani.
- Waxaad la taliyaha tababarka ka codsan kartaa in uu kula fariisto inta lagu jiro wareysiyada isla markaana jawaab celin kaa siiyo nidaamka wareysiga Fiiri qaybta Caawimaada mar dambe oo dokumentigan ka mid.
- Si aad u joojiso xayaysiis, waxaad geshaa meesha la sii gelayo ee tilmaamaya Soo geli Xayaysiis “Post Ad” isla markaana dooro badhanka tilmaamaya Jooji Xayaysiis “Cancel Ad”.

Riixka halka ay ku qoran tahay Soo geli Xayaysiis “**Post Ad**”, ee ku taala hoosta marka diyaar la yahay.

Ad Duration

Contact Information

Contact Name

Contact Phone Number

Contact Email Address

Personal Statement

You may enter up to 2500 characters of additional information that you would like to share with prospective workers.

Tusaalaha qoraalka shakhsi ahaaneed

“Magacaygu waa Judy. Waxaan ahay qof si fiican u abaabulan oo jecel kalluumaysiga iyo isku imaanshaha qoyska. Gurigeygu waxaa ka buuxa taariikhda Ruushka oo aan anigu ku faanayo! Waxaan isticmaalaa kursiga curyaanka ‘wheelchair’ waxaan raadsanayaa caawimaad aan helo laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 11 subaxnimo maalin kasta si aan sariirta uga kaco, u lebisto, isla markaana aan quraac samaysto. Waxaan xiiseynayaa qof xirfadle ah oo si fiican abaabulan, daryeel leh, samir leh, kalsooni leh isla markaana waayo-aragnimo u leh daryeelida qof leh xanuunka sonkorta iyo dhiig karka. Waxaan doorbidayaa qor dhammeystay gargaarka degdega ah/ CPR-ka iyo sidoo kale shahaadada dugsi sare isla markaana haysta ruqsadda baabuurka lagu wado oo cusub oo leh caymis.

Jawaabta shaqaalaha ee xayaysiiska

Shaqaalaha ayaa ka soo jawaabi doona xayaysiiskaaga iyaga oo si toos ah ku soo wacaya ama email kuugu soo diraya. Ka codso shaqaalaha in uu bixiyo lambarkiisa daryeel bixinta (qoro si aad u siin karto shaqaalahaaga kiiska, wakiilkaaga shakhsi ama iskuduwahaaga adeegyada haddii doorato in aad shaqaaleysiiso qofka). Inta lagu jiro wareysiga, weydii su'aalo si aad u xaqiijiso in shaqaaluhu leeyahay xirfadaha iyo kartida aad raadinayso; ma awoodi doontid in aad ka aragto ama kordhiso "expand" sharaxaada shaqaalahan ee ku qoran Diiwaanka. Badhanka tilmaamaya Kordhi "Expand" waxaa kaliya oo laga heli karaa liiska tixraaca. La taliyaha tababarka ayaa kaa caawin doona sameynta su'aalaha wareysiga si loo xaqiijiyo in shaqaaluhu uu yahay mid kugu habboon (Hoosta ka fiiri macluumaadka Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo ee ku hoos jirta Caawimaada)

Ka bax 'Log off'

Marka aad dib u eegto isla markaana cusbooneysiiso macluumaadkaaga, riix halka ay ku qoran tahay Ka Bax "Log Off" ee ku taala dhinaca sare ee midigta.

Caawimaad

Haddii aad ilowday magacaaga lagu gelayo ama lambarka/xarafka sirta ah 'password', ama aad caawimaad kale uga baahan tahay Diiwaanka, email u dir Registry.OHCC@State.OR.US, ama wac 1-877-867-0077. Shaqaalaha waxaa la helayaa saacadaha shaqada ee caadiga ah ee maalmaha shaqada.

Haddii aad u baahan tahay qof kaala taliya waxyaabo ku saabsan mas'uuliyadahaaga dhanka shaqo bixiyenimo, Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon waxay bixisaa barnaamij gaarka oo kaliya diiradda lagu saarayo in lagaa caawiyo in aad guulaysato adiga oo ah shaqo bixiyaha shaqaalahaaga daryeelka guriga ama shaqaalahaaga taageerada shakhsiyeed. Barnaamijkaaga Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo waa mid lacag la'aan ah u ah dadka loo oggolaaday in ay helaan adeegyada guriga laga bixiyo iyada oo la isticmaalayo Medicaid ama Mashaariicda Madaxa bannaan ee Oregon. Ka qayb qaate ahaan, waxaad heli doontaa qalab, ilo iyo taageero si aad u noqoto cida loo shaqeeyo ee ugu wanaagsan ee aad noqon karto. La taliyayaasha ayaa haga isla markaana bixiya adeegyo kala duwan sida:

- In ay kaa caawiyaan sameynta sharaxaadda ku qoran Diiwaanka
- In ay kaa caawiyaan sameynta su'aalaha wareysiga
- Qabashada wareysiyo tababar lagu yeesho si loo dhiso xirfadaha qofka wax wareysanaya
- In ay kaa caawiyaan sameynta qorshe bedelka ah haddii ay dhacdo in shaqaaluhu awoodi waayo in uu shaqada yimaado.
- In ay kaa caawiyaan barashada sida xuduudaha xirfadeed loola ilaaliyo shaqaale
- Iyo kuwo kale oo badan!



Teach • Empower • Assist • Mentor

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo, la xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon Barnaamijkiisa Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo (oo hore loo yaqaanay STEPS) 1-877-867-0077 isla markaana dhageyso waxyaabaha la kala dooranayo. Waxaad sidoo kale email u diri kartaa OHCC.ERC@state.or.us.



Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Oregon Home Care Commission kala xiriir 1-877-624-6080. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.